



**DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA GAROOWE  
DAWLADDA PUNTALAND EE SOOMAALIYA**

**WARGELINTA DADWEYNAHA  
EE  
QORSHA HAWLEEDKA DID UDEJINA**

**Juun 6, 2021**

Taageerada Wejiga Labaad ee Mashruuca uu maalgeliyo Bangiga Adduunka ee Adkaysiga<sup>1</sup> Magaallooyinka Soomaaliyed, Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay qorsheysay in ay dhisto shan (5) waddo oo laami ah iyo hal (1) buundo. Waddooyinka la dhisio doono cabbirkoodu wuxuu dhan yahay 7.6 km waxayna kala yihiin:

1. Waddada Waaberi (aaga Saddex Kiddigood ilaa Kaam Shabeelle);
2. Waddada Injida (waxay isku xiraysaa Waddooyinka Islaan Maxamed iyo Shiikh Cabdulqaadir);
3. Waddada 30-ka (dhanka Koonfureed);
4. Waddada Towfiiq (wadada hormarta Isbageeti);
5. Waddada hormarta Dugsiga Sare ee Gambool, Jaamacadda Dawladda Puntland (Puntland State University) iyo Cisbitaalka Garoowe; iyo
6. Buundo loo maro Cisbitaalka iyo Goobaha kale ee Waxbarashada.

Waxaa la diyaariyey Qorshaha Dib u dejinta kaas oo qeexaya hawlahay ay qaban doonto Dawladdu, kuwaas oo la xiriira saameyn ta tooska ah ee ku imaan karta bulshada iyo dhaqaalahooda ee ka dhalan kara Barakac aan khasab ahayn ee mashruucu sababo.

Iyada oo la tixraacayo Shuruucda Dawladda Puntland iyo Halbeegyada Deegaanka iyo Bulshada ee Bangiga Adduunka, gaar ahaan Halbeega Shanaad (5<sup>aad</sup>) ku aaddan Dhul Kala noqoshada, Xaddidaadda Istimmaalka Dhulka, iyo Barakac aan Khasabka ahayn, waxaa qiimeyn lagu sameeyey sameyn ta mashruuca, waxaana la ogaaday in mashruucu uu saameynayo 11 qoys oo ka kooban afartan iyo saddex (43) qof oo 32 ka mid ah ay yihiin carruur. Qorshaha Dib u dejintu waxa uu ku wajahan yahay waddooyinka oo kaliya, halka buundadu ay yeelan doonto qiimeyn gaar ah oo isugu jirta sahaminta saameyn ta deegaan iyo bulsho ee ka dhalan karta dhismaha buundada iyo diyaarinta Qorshe Dib u dejin eek u aadan dadka hawlahay buundadu ay saameyn doonaan.

<sup>1</sup> Sidii ay ugu adkaysan lahaayeen colaadaha iyo masiibooyinka dabiiciga ah.

Qorshaha Dib u dejintu waxa qeexayaan yoolasha iyo waqtiga fulinta mashruuca, shuruudaha u qalmitaanka Dadka Mashuuruca Saameeyey (DMS), shuruucda iyo hay'adaha dawliga ah ee ku lug leh, habka loo maray qiimeynta hantida dadka mashruucu saameyey, magdhawga, ka qaybgalka iyo la tashiga, iyo habka xalinta cabashooyinka. Si aad uga mid noqoto dadka magdhawga helaya, waa in la qiimeyey hantidaada mashruuca saameynta ku yeeshay wixii ka horeeyey Janaayo 10, 2020.

Mashruucu waxa uu saameeyey 25 hanti ma guurto ah kuwaas oo ay ka mid yihiin labo (2) qol, afar (4) jiko, shan (5) deyr guryo, labo (2) berkadoo, shan (5) sandaqado, shan (5) musqulood, iyo labo (2) bulaacadood. Dawladda Hoose ee Garoowe ayaa bixinaysa magdhawga hantidan oo dhan ka hor inta aysan bilaaban hawlahaa la xiriira dhismaha wadooyinka cusub. Qiimaha magdhawga ee la siin doono DMS waxa uu dhan yahay Sideed iyo Labaatan Kun Labo Boqol Sideetan iyo Todobo lacagta qalaad ee Dollar ah (\$28,287.00).

Dhirta iyo tabeelayaasha korontada ka dhex taagan wadooyinka dheddooda, waxaa la siin doonaa tixgelin gaar ah, dhirta waa la ilaalinaya, halka tabeelayaasha korontada meelaha ku habboon loo wareejin doono. Ma jiraan wax saameyn ah oo u baahan in dib u dejin ah ama khatar ku aadan burburinta ilaha dakhli ee qoysaska mashruucu saameynta ku yeeshay.

Ugu dambeyn, Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxaa mar walba ka go'an dhowrida iyo horumarinta deegaanka iyo arrimaha bulshada. Gaar ahaan, mashruucan waxa uu noo leeyahay muhiimad weyn, waxaana dhowaan bilaaman doona hawlahaa hirgelinta waddooyinka shanta ah iyo halka buuno ee kor ku xusan.

**Fiiro gaar ah:** Buundada iyo waddada hormarta Dusgiga Sare ee Gambool iyo Jaamacadda Dawladda Puntland dhismahoodu wuu ka dambeyn doonaa waddooyinka kor ku xusan, waxayna yeelan doonaan qorshe hawleed dib u dejin.

Mahadsanidiin,

**Wada Shaqeyn Wacan,**